

Isbeddellada Guud ee Ugu Muhiimsan

Afar shaqaalaha gargaarka ah iyo laba duuliye oo la haystay ilaa Nofembar 2008dii ayaa la soo daayey 11kii Agoosto. Afarta shaqaalaha gargaarka ah oo u shaqeynayey Ururka La Dagaallanka Gaajada/Action Contre la Faim (ACF) ayaa 5tii Nofembar 2008dii lagu afduubey magaalada Dhuusamarreeb, gobolka Galaduud. Waqtigan la joogo, 13 shaqaalaha gargaarka ah ayaa weli lagu haystaa Soomaaliya.

UNICEF ayaa ku khasbanaatey in ay dib u dhigto diriddii boqollaal tan oo sahayda nafaqada ee nafaha lagu badbaadiyo ah arrintaas oo ay sababtey shaqaadada ka dhanka ah ururada gargaarka oo korodhey. Sahaydaas ayaa loola jeedey in looga hortago laguna daweyo nafaqo-xumada ba'an ee soo wajahday in ka badan 85,000 oo carruur Soomaaliyeed ah oo ku nool bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya. Marokaneecooyinkii looga hortegayey duumada (malaariyada) oo loo qaybin lahaa in ka badan 100,000 oo haween iyo carruur ah ayaa iyana ay carqaladeyn ku timid. War la soo saarey 13kii Agoosto, ayaa ay Marwo Rozanne Chorlton, oo ah Wakiilka UNICEF Soomaaliya waxa ay ku tiri "Waxa aan u baahannahay in aan maamullada degaanka ka helno ballanqaadyo adag oo ku aaddan in gaarsiinta iyo kaydinta sahayda ay u dhacayso si ammaan ah si aan markaa u sii wadno barnaamijyada lagu badbaadinayo carruurta iyo haweenka Soomaaliyeed oo aan uga hortagno geeridii haddii kale ku imaan lahayd."

Shan ka mid ah goobaha raashinka karsan lagu qaybiyo oo Muqdisho ku yaalla ayaa dib loo furey 8dii Agoosto ka dib markii muddo bil ah ay u xirnaayeen nabadgelyo-xumo daraaddeed. Arrintan ayaa ka dhigeysa tirada goobaha cuntada karsan lagu bixiyo ee shaqeynaya 15 ka mid ah 16kii goobood ee horey u jirey. Keliya hal goob oo ku taalla degmada Cabdulcasiis ayaa weli harsan. Toban xarumood oo kale ayaa dib u bilaabey barnaamijkoodii quudinta ku dhowaad laba toddobaad ka hor. 16kaa goobood ayaa celcelis ahaan ay 80,000 oo dad nugul ah ay maalin kasta ku helayeen cunto karsan.

Toddobaadka dhexdiisa, aqoon-is-weydaarsiyadii gudaha ka dhacayey ee Geeddi-socodka Codsiyada Isku jira (CAP) 2010ka ayaa si guul leh loogu qabtay Somaliland iyo Puntland. In ka badan 150 ka-qaybgale, oo ay ka mid ahaayeen maamullada degaanka ayaa labada gooboodba kaga qaybgaley. Wadatashiyada Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya ayaa Nayroobi ka dhici doona 18ka Agoosto. Aqoon-is-weydaarsiga ugu dambeeya ee CAP 2010 oo ah mid loo dhan yahay ayaa Nayroobi ka dhici doona 20ka Agoosto kaas oo dib u eegaya guulihii la gaarey 2009ka kana munaaqashoon doona baahiyaha iyo waxqabadyada 2010ka, iyada oo lagu xisaabtamayo wixii ka soo baxay saddexda aqoon-is-weydaarsi ee gudaha ka dhacay.

Waxqabadka

12kii Agoosto, UNICEF iyo WHO oo ay la hawlgalayeen maamullada degaanka ayaa bilaabey wejigii labaad ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Somaliland. Ku dhowaad 440,000 oo carruur ka yar shan sano jir iyo 500,000 oo haween ku jira da'dii dhalidda ayaa ay beegsan doonaan in ka badan 5,000 oo iskaa-wax-u-qabsadayaal ah. Waxaa la bixin doonaa xirmo ka kooban adeegyada muhiimka ah ee caafimaadka oo ay ka mid yihiin tallaalka jadeecada iyo dabaysha, fitamiin 'A' dheeri ah, goryaan ka dilid, kiniiniga *aqua-tab* ee lagu daweyo biyaha, waxbarashada nadaafadda, tallaalka teetanada ee haweenka iyo baaritaanka nafaqada iyo caafimaad u dirista. Koonfurta/Bartamaha iyo Puntland, ayaa wejiga labaad ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta lagu qaban doonaa min Oktoobar ilaa Disembar 2009ka. Wareeggii koowaad ee dhacay Disembar 2008dii ilaa Juunyo 2009ka, ayaa in ka badan 1 milyan oo carruur ah iyo 800,000 oo haween ah lagu gaarey Soomaaliya oo dhan.

UNICEF ayaa biyo-dhaamintii socotey (min Abriil ilaa Maajo) uga gudubtey dhisidda, dayactirka, ka shaqeysiinta iyo xafididda ilaha biyaha ee degaannada ay abuurto saameysey ee Somaliland si ay uga faa'iideystaan dad lagu qiyaasey 16,500 oo ku nool afar tuulo oo ku yaalla gobollada Sool iyo Togdheer. UNICEF ayaa sidoo kale waxqabadyada Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda ka fulineysa 11 tuulo oo ku yaalla gobollada Sool, Sanaag iyo Togdheer kuwaas oo ay ka faa'iideysanayaan 18,000 oo qof.

WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa 110 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah u qaybiyey 2,550 ka-faa'iideystayaal hoos imaneyey barnaamijka quudinta dheeriga ah ee gobolka Jubbada Hoose. Puntland ayaa 312 ka-faa'iideystayaal (oo ay ku jiraan Dadka Gudaha Ku Barokacay) ay ku heleen 5 mt oo cunto ah halka 100 qof oo la nool HIV/AIDS ay heleen 10 merik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah. Magaalada Gaalkacyo, ayaa WFP u dirtey 456 metrik ton oo cunto ah si loo qaybiyo toddobaadka dhexdiisa taas oo qayb ka ah barnaamijyada cunto-tababar-ku-beddelashada iyo quudinta dheeriga ah ee la beegsado.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org.
Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org